Indheergarad – Diisenbar 12, 2021 – Koobin - Vol: 01 – Cadadka: 102aad

CILMI-BAADHIS: Isbeddelada ku Yimid Qiimaha Suugaanta iyo Suugaanyahanka

Darse: Tawakal Cabdi Ismaaciil(MA)

Jaamacadda Jigjiga

Mac'hadka Daraasada Af-soomaaliga iyo Suugaanta

Waaxda: Daraasada iyo cilmibaadhista

abwaanxays11@gmail.com

1. Hordhac

Sida ka muuqata ciwaanka, qormadani waa daraasad aan uga golahaa inaan waxa ka iftiimiyo isbeddello guud oo ku yimid qiimaha suugaanta iyo suugaanyahanka waxaanan kaga hadlay qodobo dhawr ah kuwaasi oo aan u maray hab cilmi-baadhis, si aan u ogaado cunsurrada sal-dhigga u ah isbeddelka. Waxaanan maqaalkan ku soo koobay macluumaad badan oo aan helay muddadii aan ku guda jiray cilmi-baashista; waxaan ka soo qaatay weedhaha indheergaratada iyo hawraarta suugaanyahannada oo ah daliilada ugu miisaanka culus ee loo cuskan karo caddaymaha caqabadaha taagan iyo meesha ay ka soo unkameen.

1.1. Ujeedooyinka Daraasaadka

1.1.1. UJEEDADA GUUD

- Ujeedada guud ee daraasaadkani waa in la ogaado isbedellada ku yimid qiimaha suugaanta iyo suugaanyahanka.

1.1.2. Ujeedooyinka Gaar

Ujeedooyinka gaar ee daraasaadkani waa:

- ✓ In la muujiyo sooyaalka qiimaha suugaanta iyo suugaanyahanka.
- ✓ In labaadho cunsurada sababay isbeddellada ku yimid qiimaha suugaanta iyo suugaanyahanka.

- ✓ In la helo tabo lagu xalliyo korna loogu qaado qiimaha suugaanta iyo suugaanyahanka.

1.2. Caddaynta Dhibaatada

Suugaantu waxay laf-dhabar u tahay jiritaanka isirrada ay luuqadi leedahay, waxayna bishaa oo qurxisaa hadalka. Sidoo kale, waxay keydisaa sooyaalka hiddaha iyo dhaqanka ummadda ku hadasha afkaas. Haddaba, waxa meesha ka sii baxaaya milgihii suugaanta iyo suugaanyahanka Soomaaliyeed ay ku dhex lahaayeen bulshada, taasina waxay baaba' ku keenaysaa jiritaanka afka iyo sooyaalka ummadda Soomaaliyeed. Markaa qormadan waxay qaylo-dhaan u tahay, ka hortagga hadimooyinka ku soo foolan afka, dhaqanka iyo suugaanta Soomaalida iyo xal u raadinta cunsurrada sababaya mushkiladaha taagan.

FALANQAYNTA IYO SOO BAN-DHIGIDDA XOGTA

1.3. Qiimaha Suugaanta iyo Suugaanyahanka

Suugaanta iyo suugaanyahanku waa geed iyo midhihiis, qiimaha geed kastaa waxaa go'aamiya nooca midhaha uu bixiyo geed kaasi. Markaa, suugaanyahan kasta qiimihiisuna wuxuu noqonayaa kalba mugga iyo miisaanka ay leedahay suugaantiisu. Nin abwaan ah ayaa isaga oo sheegaya mugga iyo miisaanka suugaantiisa waa kii lahaa:

"Sida roob allaylkii da'oo, uunka wada gaadhay
Ama aar libaax oo wax badan, ay cidla ah jiifay
Goortaanse oofaha dambiyo, uurka ka higoodo
Ashqaraar haddaan loogu dhiman, maaha anigiiye"

Haddaba, si aynu u xaqiiqsano isbeddellada ku yimid qiimaha suugaanta iyo suugaanyahanka, waa inaynu milicsannaa qarnigii awowyaasheen ay noolaayeen amaba bilawgii qarnigii labaatannaad qiimaha duugaanta iyo suugaanyahku ay ku dhex lahaayeen buldhadda amaba heerka iyo dabaqadda ay ka joogeen bulshadaxilligaas. Haddaba, si aad arrintan u xaqiiqsato soo dhagadhagee kana warayso waayeelka, waxaa

kuu soo bixi in suugaantu ay suugaanyahanka u goyn jirtay, hantida ugu qaalisan ee soomaali lahayd xilligaas oo ah **geela.** Waakii abwaanku ku soo hal-qabsanayay gabaygii Salaan Carrabay uu tiriyey ee ku qotomay baydkii *"iyadana ha garan waayinee, geela igu siiya"*ee yidhi: *Gamuute iyo Salaan iyo ragii, geela lagu siiyey.* Sidoo kale abwaan Abshir Bacadle isaga oo tilmaamaya qiimaaha gabayga wuxuu yidhi*:*

→ *"Waxay odayo goob kaga hadlaan, gabaygu soomaaha*

→ ***Wixii geela lagu qaybsan jiray, gabaygu soomaaha***

→ *Tartan waxaanay heesuhu la galin, gabaygu soomaaha"*

Haddaba, gabaygu wuxuu ahaa iba-furaha xaajooyinka ama waxa ugu mudan ee nin geed ka hadlaya ama baanayaa uu adeegsado, sidoo kale wuxuu ahaa hal-beeg lagu dherersho oo lagu sadsiiyo cidda u ehelka ah, si loo dareensiiyo ruuxa kaalinta uu bulshadiisa ugu jiro loona siiyo xaqqa uu muudan yahay.

sidoo kale abwaan Salaan Carrabay isaga oo muujinaya qiimaha afka iyo suugaanta waa kii lahaa:

- *"Xubin rag isku waa jahay hadday, xayga ka caddaato*
- *Afku wuxuu la xoog yahay magliga, xawda kaa jara e"*

Sidaaderteed waxaa arrintan ku garwaaqsanaynaa qiimaha ay suugaanta leedahay. Dhinaca kale, haddaynu sawir ka bixinno sida ay bulshadu u qiimayn jirtay suugaanta iyo suugaanyahanka, waxaynu odhan karaa suugaanyahannimadu waxay ahayd aqoon iyo xirfad Rabbani ah cidda u ehelka ah ama hibada u lihina waxay ahaayeen xidigo lagu faano oo agtooda lagu soo hirto. Waxaa arrintaas inoo caddaynaya meerisyo ku jira gabay uu tiriyey abwaan Salaan Carrabay, wuxu yidhi:

→ *"Xidaar baa khaliqigu ii yaqaan, xay iyo maamuse*

→ *Xamdi baaba lay wada naqaa, xeeb haddaan tago'e*

→ *Sida xayska hooraa nafluhu, ii xiddigiyaaye"*

Muujinta Isbeddellada ku Yimid Qiimaha Suugaanta iyo Suugaanyahanka

Si aynu u dareenno meelaha ay ka unkameen isbedellada ku yimid qiimaha suugaanta iyo suugaanyahanka, bal aynu soo qaadano qaar ka mid ah hadalada cabqariyiinta iyo in dheer-garadta Soomaaliyeed. Munaasabad lagu maamuuaayay maalinta caalamiga ah ee afka hooyo 2019kii, AHUN abwaan Siciid-biid oo ka hadlay ayaa wuxuu is barbardhig ku sameeyey heesaha maanta iyo heesihii hore ayaa wuxuu soo qaatay hees uu sameeyey Cabdiqaadir Xirsi 'Yam-yam' oo tidha *"xalay galin dhexaadkii/ mar aan mayrac guuraha.."* iyo heesta tidhaa *"xalay ban riyoodoo, xilwa xilwa/ xaafaddiina tagayoo xilwa xilwa"*. Markaa isbedddelka iyo hoos u dhaca ku yimid suugaantu waa mid guud ahaan wax-garadka bulshadu dareensan yahay.

Isbeddelkan ku yimid qiimaha suugaanta iyo suugaanyahanku waa mid muddo badan soo jiitamayay, wuxuuna soo maray heerar kala duwan. Hilaadii badhtamihii qarnigii 20 aad wakhtigii ay heesaha qaraamiga ahi soo caan baxeen; waxay bilaabeen in ay bara-bixiyaan oo xilka kala wareegaan noocyada maansada, gaar ahaan gabayga oo ah boqorka maansada. Mar uu soo ifbaxa iyo ifafaalada arrintaas ku soo hal qabsaday "Dhoodaan" waa kii lahaa:

→ *"Qaraamiga iyo heesay wakhtigan uga qushuucaane*

→ *Ka qulquliya geeraarka aad, looma qaayibo e."*

Sidoo kale AHUN abwaan "Timacde" isaga oo tilmaamaya waxyeelada ay heesuhu ku hayaan maansada qaybaheeda kale waakii lahaa:

✓ *"Maansada qaraamigan yaryar, ee qayliyaa dilaye"*

Arrintan xaqiijinteeda haddiba aynu dib u milocsano 60 sanno ka hor heerka tayada iyo tirada suugaanyahanka Soomaalida, waxaa inoo caddaanaya caddadka iyo baaxadda hoos u dhaca ku yimid suugaanta iyo suugaanyahanka soomaalida, waxaana ka

markhaati ah natiijada ka soobaxday isbar-bardhig aan ku sameeyey, qodobo dhawr ah sida: **Tirada iyo tayada abwaanada, magaca iyo maamuuska abwaanka, miisaanka iyo meeqaanka midhaha suugaantii hore dhexe iyo dambe, iwm.**

1.4. Cunsurada Sababay Hoos u Dhaca Qiimaha Suugaanta iyo Suugaanyahanka

Isbeddellada ku yimid qiimaha Suugaanta iyo suugaanyahanka waxaa sabab u ah qodobo dhawr ah oo ku soo kordhay bulshadawaxaana ka mid ah:

1) **Hoos u dhaca adeegsiga iyo isticmaalka suugaanta**
   Suugaantu hadda ka hor waxay ahayd mid loo adeegsado dhammaanba docaha kala duwan ee hab-nololeedka bulshada gaar ahaan dhanaca isgaadhsiinta iyo xidhiidhka bulshada. Balse, maanta warbaahinta casriga ah iyo teknoolajiyada ayaa hawshaas badankeeda kala wareegay. Sidoo kale suugaanta waxaa loo adeegsan jiray sugidda sooyaalka iyo keydinta dhacdooyinka, maadaama ay tahay wax ku hadhaysa dhiganayaasha taariikhada iyo kolba qalbiyada jiilasha nool.

2) **Hoos u dhaca fahanka bulshada ee ku aaddan nuxurka iyo qiimaha suugaanta**
   Hadda ka hor suugaantu waxay ahayd farshaxan gaar ah oo lagu sawiro marxalad kasta oo nolosha ka mid ah. Waxayna ahayd af asluubeed cid kasta wax ku codsata si gaar ah loogu tixgaliyo, taasina waxay waajibinaysay in qof kasta uu il gaara ku fiirsha barashadeeda iyo u kuur galidda nuxurkeeda si uu maalintiisa ugu baahi baxo. Haseyeeshee, jiilka maantu kama war qabaan waxa geydo iyo waxay goyso toona waayo ma fahmaan u mana adeegsadaan kaalin teeda. Maadaama uu yaraadey adeegsiga suugaantu waxa ka dhashay is fahan waa ka dhex aloosmay sarbeebta iyo erayagda mugga leh ee ku jira suugaanta, waxayna badday

suugaantii hoos udhac iyo xiisayn la'aan, maxaa yeelay shay kasta qiimahiisa waxaad ku sargoynaysaa kolba fahanka aad ka haysato iyo milgaha iyo maamuuska uu agtaada ku leeyahay inta ay le'egtahay.

Isaga oo ka walwalsan hoos u dhaca fahanka bulshada ee ku aaddan nuxurka suugaanta waa kii "Dhoodaan" la haa: *"Haddaan gabayga saab ugu dhex rido, saafan maahayaane"*.

Haddaba, hoos udhaca afeed ee ku yimid da'yarta ayaa keenay in ay fahmi waayaan waxa uu sheegayo abwaanku, taasina waxay hoos u dhac ku keentay in suugaanyahannadu ay curiyaan maansooyin culus oo murti iyo sarbeeb miidhan ah.

3) **Hoos u dhaca qiimaha suugaanyahanka**

Geyiga Soomaalida 1940 meeyadii, ka hor ma jirin wax fanaan layidhaa mana jirin cid ku caan baxday shaqana ka dhigatay soo gudbinta suugaan aysan ayagu lahayn, haddiiba aad aragto cid sooban-dhigaysa ama isticmaalaysa suugaan aysan ayagu lahayn, waxaa jirtay shaqsiyaad isticmaala qaar ka mid ah hees-haawleedyada, heesaha maaweelada carruurta iwm oo ah suugaan dadweyne amaba suugaanta la dhaxlay, balse hadda doorkii suugaanyahanka waxaa la wareegay nin kale oo codeeye ah (microphone) waana fanaanka. Taasina waxay sababtay in dad badan oo suugaanta ehelkeeda ahaa, ay iska daayaan curinteeda, maadaama aysan haysan cid fahmaysa qiimaynaysana murtida iyo hibada ay xambaarsan yihiin. Waa kuwan meerisyo caddeynaya jiritaanka xaaladdan:

- *"Aniguna bilu aadmigii, Eebbe iga beeray*
- *Murti kama bakhaylinne dakaan, baahideed qanine*
- *Mal maantana tix aan baro wakhtigu, hayga baaba'o e". (Abwaan)*

4) **Hoos u dhaca tirada suugaanyahannada**

Xaqiijinta arrintani waxay u baahan tahay cimi-baadhis ka xeel dheer midan aan anu ku sameeyey, balse, sida aan qabo anigu yaraanshaha ku yimid tirada

suugaanyahannada, waa xaalad laga dareemi karo guud ahaan jawiga bulshada Soomaaliyeed waana arrin ay ka war-qabaan xaqiiqadeeda dhammaan waxgaradka iyo waayeelka bulshadu.

Abwaan Yuusuf Maxamed Sugaal AHUN isaga oo tilmaamaya tira badanida suugaanyahannadii Soomaaliyeed waa kii lahaa:

"Rag farshaxan hawraareed ah oo, dad u fagaareeyo
Oo fasira naxwaha dhaaxa way, fara badnaayeen"

Taasina waxay muujinaysaa in tirada maansoyahannada soomaaliyeed ay ka badnaayeen tirada maansoyahannada wakhti xaadirkan nool.

Ugudambayntii, waxaa is waydiin mudan in aynu darisno waxana iska weydiino meesha uu caynku ka qaloocsamay (maxaa keenay hoos u dhaca tirada iyo tayyo darrida suugaanyahannada?)Waxaan filayaa inay qayb ka yihiin arrimo badan oo ay ka mid yihiin:

5. **Maamuus yarida xukuumadda iyo shacbiga uu kala kulmayo maansayahanku.**
   Qodobkani waa mid si kooban u tibaaxay abwaan Yuusuf Maxamed Sugaal wuxuuna yidhi:

   "Ummadi way ku faantaa wadani, qaran u fiidhoone
   Soomaali baan faced libin u hurin, faariska u mudane
   Fariid xasadku waa waxa ka dhigay, duul fadhiido ahe".

6. **Hoos u dhaca culuumta diiniga ee bulshada**
   Sidoo kale, waxaa saamayn xooggan ku leh isbeddelladan, hoos u dhaca cilmiga diiniga ah ee bulshada, waayo diinteenu waa mid boorinaysa barashada cilmiga iyo ku dadaalida waxyaabaha nafciga leh, iyo waliba ka tagidda waxyaabaha bilaa macniga ah oo waaka Rasuulkeena Muxammed NNKH yidhi: "qofka muslimka

ah wanaagiisu waa in uu ka tago waxyaabha maalayacniga ah". Markaa, qofkasta oo dhaqan galiya xadiiskan waxaa hubaal ah in uu ka waantoobayo ku mashquulka iyo xiisaynta waxyaabaha micna darada ah.

7. **Isbeddellada guud ee ku yimid geyiga iyo meerto nololeedka bulshada**
   Magaalooyinka, teknolajiyadda, caalamiyeynta iyo wax ku barashadda afafka qalaad.

Bal aynu isla eegno jiiftada "**Dabahuwan"**ee uu tiriyey abwaan Hadraawi taasi oo si mug iyo miisaan leh ugaga hadlay isbadalada ku yimiid guud ahaan dhaqanka bulshada Soomaaliyeed markii uu dareemay ifafaalaha iyo arrimaha is biirsadey ee ku soo wajahan bulshada. Sida aad ka dheehankarto meerisyada kala ah: *Dad kala guran bay lahayd/ Duq iyo garashay lahayd/ Dallaayad saray lahayd/ Xil daacada bay lahayd/ Diin iyo dhaqan bay lahayd/ Is daadihin bay lahayd/ Wixii dumay bay lahayd!* Waxaa halkaas inoogu cad in isbeddel weyn ku yimid dhaqanka taasina ay sababtay in uu hoos udhaco qiimaha suugaanta iyo suugaanyahanku, waayo suugaanta iyo suugaanyahanku waxay waayeen hab-nololeedkii ay xurmada ku dhex lahaayeen oo ah waxyaabahaa dumay ee uu Abwaanku sheegay. Sidaaderteed, isbeddellada ugu badan waxaa sababay oo sal-dhig u ah isbeddelkaa guud ee ku yimid dhaqanka iyo afka.

TALO-BIXIN

Qodobada ugu mudan ee aan ku talinayo in wax laga qabto, si loo xalliyo mushkiladda taagani waa:

- In kor loo qaado heerka aqoonta afeed ee da'yarta Soomaaliyeed
- In la sameeyo xarumo dhaqameed lagu keydsho aataarta kala duwan ee dhaqanka.

- In la kor dhiyo macadyada diiniga ah, si loo abuuro jiil fayow oo ka faana fanka micnadarada ah ee ku dhisan muusiga iyo aralaaska shaydaanka ee dhiirigalinaya macnadarada iyo ku mashquulka suugaanta madhan ee bilaa xigmadda ah.
- In la sameeyo maalmo iyo masraxyo caan ah oo si gaar ah loogu maamuuso suugaanyahannada.
- In wax laga qabto kooxaha iyo shaqsiyaadka tacdiga ku haya fanka iyo suugaanta.

Raad-raac

Tawakal Cabdi I. (2020) *Dheefta Suugaanta:* Qaahira: Hiilpress (bog 234-36)